**WASAARADDA CAAFIMAADKA**

# DOWLADDA PUNTLAND EE SOMALIA

# SIYAASADDA KALA-KORINTACARUURTA IYO MAARAYNTA KHARASHAADKA KU BAXA

# 2020-2024

December 2020

**Qaabka loo tixraacayo: Dowladda Puntland ee Somalia.**
**Siyaasadda Kala-Korinta Caruurta iyo Maaraynta Kharashaadka ku baxa 2020-2024.**

# WASAARADDA CAAFIMAADKA

# DOWLADDA PUNTLAND EE SOMALIA

# SIYAASADDA KALA-KORINTA IYO MAARAYNTA KHARASHAADKA KU BAXA

# 2020-2024

**Diisamber 2020**

Liiska Shaxda


**Shaxda 1aad . Waxyaalaha ay Xoogan-yihiin, Ku-Liitaan, Fursadaha iyo Caqabadaha (SWOT) Analysis** ........ 20
**Shaxda 2aad: Kharashaad-ka Agab-yada Kala-Korinta ee Sanadkasta.** ........ 36
**Shaxda 3aad. Kharashaadka marka loo fiiriyo Qorshe-howleedkasta, MilyanUS$*** ........ 38
**Shaxda 4aad. Kharashaadka Ballan-qaadyada Kala-Korinta Caruurta, Sanadkasta, Milyan US$** ........ 39
**Shaxda 5aad. Kharashaadka Madax-yada ugu muhiimsan Istiraatiijiyadda., Sanadkasta, Milyan US$** ........ 40

Liiska Sawirada

**Sawirka 1. Isticmaalka Kala-Korinta Caruurta laga soo bilaabo Sanadkii 2015-2019** ........ 15
**Sawirka 2 : Heerka Adeeg bixinta Barnaamijka Kala-Korinta Caruurta gobol-kasta ee Puntland** ........ 16
**Sawirka 3. Kharashaadka Istiraatiijiyadaha Muhiimka ah.** ........ 24
**Sawirka 4. Kharashaadka Baahi-Abuurista** ........ 26
**Sawirka 5. Kharashaadka Adeeg Bixinta** ........ 29
**Sawirka 6. Kharashaadka Agabka Kala-Korinta Caruurta** ........ 30
**Sawirka 7. Kharashaadka Kor-Joogtaynta iyo Isuduwidda** ........ 31
**Sawirka 8. Kharashaadka Siyaasadda iyo U Qareemidda** ........ 33
**Sawirka 9. Kharashaadka Mas'uuliyadda iyo Maamulka** ........ 34
**Sawirka 10. Kharashaadka Maaliyadda** ........ 35
**Sawirka 11. Kharashaadka Qorshe-Howleedyada** ........ 38
**Sawirka 12. Kharashaadka Ballan-qaadyada Kala-Korinta Caruurta** ........ 38
**Sawirka 13. Kharashaadka Madax-yada ugu muhiimsan Istiraatiijiyadda.** ........ 39

**EREYGA WASIIRKA**

Dowladda Puntland ee Somalia waa Dowlad Goboleed xubin ka ah Somalia oo la asaasay 1998. Dowladda Puntland waxay muhiimad gaar ah siisay sidii loo yarayn lahaa xanuunada ku dhaca Hooyada sidoo kalena sababikara Dhimasho. Dowladdu iyadoo arintaas ka duulaysa waxay kor u qaaday helitaanka adeegyada Kala-Korinta Caruurta oo looga gol leeyahay Kala-dheeraynta caruurta arintaas oo loo arkay in ay kor uqaadayso nolosha hooyada iyo qoyska. Shirar kala duwan oo looga hadlayay Kala-Korinta Caruurta ee lagu qabtay Magaalada London taariikhdu markay ahayd 2015 iyo 2017, Soomaaliya iyo Wadamo badan oo aduunka ka mid ah waxay ballan-qaadeen siyaasadda Kala-Korinta Caruurta iyadoo la fududaynayo korna loo qaadayo helitaanka adeeg tayo leh oo ku saabsan caafimaadka taranka oo ay ku jirto kala dheeraynta caruurta.

Qorshahan waxa uu ka caawinayaa Dowladda Puntland ee Somalia in ay ogaato baahiya ka jira adeegyada caafimaadka taranka iyo Kala-Korinta Caruurta si loo dajiyo siyaasado kale oo lagu hormarinayo adeegyada Caafimaadka. Sidaas darteed Qorshahan waa qorshe howleed lagu ogaanayo sidoo kalenah lagu maaraynayo ama lagula soconayo kharashaadka kala duwan ee Kala-Korinta Caruurta. Siyaasaddaan waxay dhiiri galinaysaa isla-xisaabtan taas oo kor u qaadaysa adeegyada caafimaadka taranka oo masuuliyad wadareed ah.

Dhismaha Qorshahaan waxa uu ku bilowday la tashiyo kala duwan oo lala sameeyey qaybaha kala duwan ay khusayso oo ka shaqeeya adeegyada caafimaadka sida Xubno ka socda Bulshada Rayidka ah, Hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah iyo Wasaaradaha bahwadaagta la ah caafimaadka. Habraac-yada Qorshahaan sidoo kale waxa uu waafaqsan-yahay Qorshe-howleedka Dowladda Puntland ee shanta sanadood.

Dhammaan Hay'adaha kala duwan ee caawiya adeegyada Caafimaadka waxaan ka codsanaynaa inay taageeraan Qorshahaan si loo hubiyo horumarka laga sameeynayo in la rumeeyo gaarista Adeeg Caafimaad oo tayo leh.

**Mudane. Dr. Jaamac Faarax Xasan**
**Wasiirka Caafimaadka Dowladda Puntland**

---

**EREYGA AGAASIMAHA GUUD**

Dhamaystirka Siyaadda Kala-Koritna-ta Qoyska waxaa fulisay Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland iyadoo taageero ka helaysa Hay'adda Caalamiga ah Save the Children. Maalgalinta Qorshahaan waxaa fududeeyey Hay'adda Qaramada Midoobay ee UN Foundation iyadoo u soo marisay sanduuqa FP2020.

Qorshahan Dhamaystir ma noqdeen hadii aysan talo bixin ka gaysan dhamaan xubnihii ka qayb-qaatay dhamaystirkiisa.

Marka ugu horeeya waxaan u mahad-celinaynaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka ee Dowladda Puntland Hon. Dr. Jaamac Faarax Xasan taageerada hagar la'aanta ah uu ka gaystay dhamaystirka qorshe howleedkan.

Waxaan sidoo kale u mahad-celinayaa La talihii Qorshe-howleedkan Mr. Mohamed Khaalid Ali, talooyinkiisi muddadii uu socday dhisma qorshe-howleedkan. Waxaa kale oo u mahadcelinayaa Shaqaalaha Caafimaadka ee Hay'adda Save the Children.

Waxaan ugu baaqaayaa dhamaan saaxiibada Wasaaradda Caafimaadka inay ku dhaqmaan ayna la jaan-qaadaan howlgalinta Qorshe-Howleedkan si looga fogaado is barbar-yaac.

**Mudane. Dr. Abdirizak Xirsi Xasan**
**Agaasimaha Guud.**
**Wasaaradda Caafimaadka**

## QAYBTA-1AAD: GOGOL-DHIG

Soomaaliya waxay kaalimaha ugu horreeya kaga jirtaa waddamada ay aadka u sarrayso adduunka dhimashada hooyo, 100,00 oo hooyo ilma caadi u dhala waxaa ummul raaca 692 kamid ah sanadkii 2019 (Directorate of National Statistics Federal Government of Somalia, 2020) Soomaaliya waxay xubin ka noqotay FP2020 sanadkii 2015 waxay sidoo kale qayb ka ahayd wax ka badalkii heshiiska Kala-Korinta Caruurta sanadkii 2017 si loo ogaado caqabadaha ka jira helitaanka adeegyada caafimaadka taranka, sidoo kalekor u qaadista caafimaadka hooyada, dhallaanka iyo caruurta iyadoo mudnaanta la siinayo bulshada nugul (FP2020, 2017).

Dowladda Puntland ee Soomaaliya waxay dhaqan galisay habraacyo kala duwan oo kor lagu dar-dar galinayo yaraynta dhimashada hooyada. Sanadkii 2013, Dowladda Puntland ee Somalia waxay sidoo kale dhaqan galisay Siyaadda  Caafimadka Dalka iyadoo loo marayo dhaqan-galinta Xirmada Asaasiga ah adeegyada Caafimaadka kaas oo muhiimaddiisu ahayd daadajinta adeegyada caafimaadka heer degmo (Federal Ministry of Health and Human Services, 2017).

Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland waxay dhaqan galisay siyaasado iyo habraacyo kala duwan taas oo lagu qorshaynayo adeegyada Caafimaadka ee deegaankeeda. Baahiyaha muhiimka loo arkay in la hormariyo waxaa kamid ah Siyaasadda Kala-Korinta Caruurta iyo maaraynta kharashaadka lagu dhaqan galinayo si ay u fududaato in ay isla jaan-qaadaan hay'adaha bahwadaagta la ah Wasaaradda Caafimaadka oo fuliya adeegyada kala-korinta caruurta.

Dhamaystirka qorshahaan waxa ay ahayd guul balse caqabado yar yar ayaa soo foodsaaray intii lagu jiray in la dhamaystiro qorshahan.

1. Xogta maaraynta kala korinta caruurta waxay u baahantahay in lahelo tirada rasmiga ah ee dumarka gaaray da'da qaangaarka iyo sidoo kale tirada gabdhaha aan wali qaan-gaarin.
2. Caqabadaha ku yimid qorshe-howleedkan waxaa kale oo ka mid ah in aan la helin wakhti badan oo ku filan oo la tashiyo lala sameeyo qaybo badan oo muhiim ahaa inay ka qayb qaataan dhamaystirka qorshe-howleedkan.

**Ujeedooyinka loo sameeyey Qorshaha Kala-Korinta Caruurta ee Puntland.**

Siyaasadda Qiimaynta Kharashaadka Mashaariicda Kala-Korinta Caruurta 2020-2024 waxaa loogu tala galay in lagu hago Mashaariicda la xiriirta Kala-Korinta Caruurta Puntland. Hadafka ugu wayn oo Qiimayntan looga golleeyahay waa in kor loo qaado Caafimaadka iyo Faya-Dhowrka Bulshada reer Puntland inay helaan adeegyo Caafimaad iyo Xuquuqda helitaanka Warbixino la xiriira adeegyada Caafimaadka ee Kala-Korinta Caruurta.

Siyaasaddan waxay hagi doontaa dhamaan Hay'adaha ka shaqeeya Mashaariicda Kala-Korinta caruurta waxayna koobaysaa dhamaan howl-qabadyada muhiimka u ah in laga miro dhaliyo iyadoo kharashaadka dhaqan-galinteeda ay u baahantahay in laga helo Hay'adaha bahwadaagta la ah Wasaaradda Caafimaadka iyo sidoo kale Dowladda Puntland.

Siyaasadda Maaraynta Kharashaadak Mashaariicda Kala-Korinta Caruurta Waxay xooga saari doontaa:

- **Helitaanka Istiraatijiyad midaysan oo ku saabsan Maaraynta Qorshaha Kala-Korinta Caruurta**: Qorshaha Maaraynta Kharashaadka Mashaariicda Kala-Korinta Caruurta ee Puntland waa qorshe-howleed lagu saleeyey isla ogol lagu hormarinayo barnaamijka Kala-Korinta Caruurta. Qorshahan Dhamaystirkiisa waxaa loo maray hab wada tashi iyadoo laga qayb-galiyey dhamaan Hay'adaha ka shaqeeya mashruucan iyo Deeq bixiya-yaasha. Qorshahan waxa uu hubin doonaa in dhammaan qorshe-howleed yada halkan ku xusan ay waafaq-sanyihiin Qorshaha Hormarinta Shanta Sano ee Puntland kaas oo faah-faahinaya dhinacyada arimaha bulshada, amniga, cadaaladda iyo dib-udhiska. Sidoo kale Qorshahan waxa uu hagi doonaa dhammaan hay'adaha ka shaqeeyaa mashaariicda Kala-Koriska Caruurta si ay qayb uga noqdaan howl-galintiisa iyo bixinta kharashaadka adeegyada ku baxaya Kala-Korinta Caruurta.
- **Qeexista Qorshe howleedyada lagu howl-galinayo adeegyada Kala-Korinta Caruurta:** Maaraynta Kharashaadka Qorshaha Kala-Korinta Caruurta waxaa uu qeexayaa dhamaan qorshe-howleedyada muhiimka u ah in la gaaro ka mira dhalinta mashaariicda Kala-Korinta Caruurta.
- **Ogaansha-ha Heerka Saamaynta:** Maaraynta Kharashaadka Qorsha Kala-Korinta Caruurta waxaa kamid ah in la tirakoobo dadka isticmaalaya adeegan, Caafimaadkooda

iyo Saamaynta Dhaqaale ee Kala-Korinta Caruurta si loogu qareemo dhaqaalena loogu raadiyo.

- **Qoondayn u Samaynta**: Mashruuca Kala-Korinta Caruurta waxa uu faah-faahinayaa dhamaan kharashaadka agabka muhiimka u ah Kala-Korinta caruurta ee Puntland. Waxa uu u qoondaynayaa qorshe-howleedkasta kharashkii lagu dhaqan galin lahaa. Arintaasi oo sahlaysa in Wasaaradda Caafimaadka Puntland ay dalbato miisaaniyadda ku baxaysa dhaqan-galinta qorshe-howleedka Kala-Korinta Caruurta ee 2020-2024. Sidoo kale Qorshahan waxa uu hagayaa Dowladda Puntland iyo Hay'adaha kala duwan inay muhiimad gaar ah u sameeyaan qoondada dhaqaalee ee lagu maamulayo Kala-Korinta Caruurta.
- **Raadinta Kharashaadka**: Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta waxa uu muhiim u yahay Dowladda Puntland iyo Saaxiibada ka caawiya adeegyada Caafimaadka inay u qareemaan dhaqaale raadinta gudaha iyo dalka dibadiisaba. Qorshe howleedkan waxa uu qeexayaa dhaqaalaha looga baahan yahay Dowladda Puntland iyo Saaxiibada kala shaqeeya mashaariicda caafimaadkay inay ku maalgaliyaan mashaaruuca Kala-Korinta Caruurta.
- **Hubinta Horumarka laga Sameeyey**: Dabagalka iyo hubtina Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta waa hab lagu cabirayo heerka dhamaystirka howl-qabadyada ku xusan qorshe howleedkan si loo hubiyo in la gaaray ujeedooyinkii laga lahaa gaarista Kala-Korinta Caruurta iyo in la hubiyo heerka wada shaqaynta si loo saxo khaladaadka imaan kara. Sidoo kale Qorshe-howleedkan waxaa loogu tala galay in markasta la cusboonaysiiyo oo lagusoo daro baahiyaha soo kordha.
- **Dajinta Qaab-Dhismeed laga wada Qayb-qaato:** Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta waxa uu dajinayaa qaab-dhismeed ujeedkiisu yahay in laga wada qayb-qaato dhamaan dhinacyada ay khusayso shaqooyinkiisa.

### Qaab-Dhismeedka loo Dajiyey Qorshe-Howleedkan

Dowladda Puntland ee Somalia waxay bilowday geedi socodka Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta bishii October 2019 iyadoo taageero ka helaysa Hay'adda Save the Children Xafiiskeeda Somalia.

Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland, Hay'adaha kala shaqeeyaa mashaariicda caafimaadka, ururada bulshada iyo qaybaha kale ee taageera mashaariicda caafimaadka ayaa ballan qaaday inay taageeri doonaan mashaariicda Kala-Korinta Caruurta waxayna dhamaantood qayb ka qaateen dhamaystirka Qorshe howleedkan ee maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta

Qiimayaasha ku jira Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka Kala-Korinta Caruurta waxa ay ahayd shaqo wadareed ay isla ogolaadeen dhammaan saaxiibada wasaaradda caafimaadka ee aan kor lagu soo xusay. Shaqo howleed kasta waxaa loo sameeyey oo qiimayn la isla ogolaaday si loo fuliyo loona gaaro ahdaaftii laga lahaa.

# QAYBTA-2AAD: FALAN-QAYNTA XAALADDA KALA-KORINTA CARUURTA

## Xaaladda Aduun-Waynaha ee Kala-Korinta Caruurta

Aduunwaynaha waxaa la isla qaatay muhiimadda ay leedahay tayaynta iyo kor u qaadista caafimaadka taranka gaar ahaan Kala-Korinta Caruurta. Waxaa la ogaaday Kala-Korinta Caruurtu inay kor u qaado badbaada hooyada xilliga uurka iyo dhalmada (Chola, McGee, Tugendhaft, Buchmann, & Hofman, 2015). Howl-qabadyada la xiriira Kala-Korinta Caruurta waxaa la ogaaday hadii la tayeeyo la gaari karo Yoolalka Hormarinta ee Millennium-ka (MDGs) sidoo kale la hiigsan karo gaaritaanka Yoolalka Horumarka Waara (Sustainable Development Goals ama SDGs).

Waxaa la isla qirsanyahay in Kala-Korinta Caruurta ay ka hor tagto Uurka ay hooyadu markaas aysan diyaarka u ahayn (tusaale ahaan hooyada marka ay nuujinayso ilmaha dhashay aysana diyaar u ahayn inay uur qaado ilaa ilmuhu uu ka gaarayo 2 sanadood) sidoo kale ay yarayn karto dhimashada hooyada xilliga uurka ama dhalmada. Kala-Korinta Caruurtu sidoo kale waxay si aan toos ahayn uga qayb qaadataa caafimaadka hooyada. Tusaale ahaan, Kala-Korinta Caruurtu waxaa la odorosay inay hoos u dhigto dhimashada ilmaha dhashay iyo kuwa da'doodu shanta sano ka yartahay (Chola et al., 2015).

Aduun-waynaha ilaa 200 million dumar ah oo ku nool wadamada soo koraya ayaa la ogaaday inay jecelyihiin Kala-Korinta Caruurta balse aysan haysan farsamooyinkii iyo agabyadii ka saacidi lahaa Kala-Korinta Caruurta.

Dumarka dhaqmaadka ah ee ku nool wadamada soo koraya waxaa la ogaaday in boqolkiiba 57% (867 million oo kamid ah) ay u baahan yihiin inay kala koriyaan ubadkooda. Tiradaas aan soo xusnay, 645 million (74%) oo dumarkaas kamid ah waxay isticmaalaan habab-ka casriga ah ee Kala-Korinta Caruurta, 222 million ee soo hartayna aysan haysan agabkii iyo farsamadii ay ku Kala-Korin lahaayeen ubadkooda taas oo keenaysa baahida loo qabo farsamooyinka casriga ah ee loo adeegsado Kala-Korinta Caruurta (Sedgh, Ashford, & Hussain, 2016).

## Hiigsiga Kala-Korinta Caruurta ee 2020 (FP2020)

Dowladda Boqortooayda Ingiriiska, Sanduukheeda Hormarinta Caalamiga ah (DFID) iyo Hay'adda Bill & Melinda Gates Foundation waxay kala shaqeeyeen Hay'adda Qaramada-Midoobay u qaabilsan maal galinta bulshada (UNFPA) in ay iskugu yeerto hogaamiya-yaasha caalamka, deeq bixiya-yaasha, ururada bulshada, hay'adaha cilmi baarista sameeya iyo dhamaan cidkasta oo u qareemidda gabdhaha iyo dumarka caalamka gaar ahaan kuwooda ku nool wadamada soo koratya si ay u heli lahaayeen farsamooyinka iyo agabyada muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta iyo sidoo kale helitaanka macluumadka la xiriira Kala-Korinta Caruurta. Dhamaan qaybahaas kala duwan aan kor kusoo xusnay waxay iskugu yimaadeen shir ka dhacay Magaalada London oo loo bixiyey "Shirwaynihii London ee Kala-Korinta Caruurta" taariikhdu markay ahayd 11 July 2012.

Shirwaynahaas mowduuciisu ahaa Kala-Korinta Caruurta, dhamaan kasoo qayb-galayaashii kala duwanaa waxay ku midoobeen inay isla dajiyaan waxyaalaha muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta. Madaxda Dowladda Soomaaliya waxay kamid ahaayeen hogaamiya-yaashii iskugu tagay magaalada London waxayna ballan-qaadeen arimahan soo socda:

### Ballan-qaad yadii Dowladda Soomaaliya ee Shirka Kala-Korinta Caruurt FP2020:

- In la hubiyo dhamaystirka heshiisyada iyo Siyaasadaha muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta marka lagaaro sanadka 2020;
- In la fahmo cabaqadaha ka haysta gabdhaha iyo dumarka Soomaaliyeed helitaanka iyo qaadashada adeegyada Kala-Korinta Caruurta marka la gaaro sanadka 2020 ka;

- In la hubiyo helitaanka adeegtada Caafimaadka Taranka oo ay kamid tahay Kala-Korinta Caruurta gaar ahaan dumarka ku nool xaaladaha adag iyadoo la hiigsanayo in xarumaha caafimaadka ay boqolkiiba 50% kamid ah laga heli karo adeegyada Kala-Korinta Caruurta marka la gaaro sanadka 2020 ka;
- In hoos loo dhigo kala go'a qalabyada iyo agabyada muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta;
- In la raadiyo kharashaadka lagu dabooli lahaa adeegyada Kala-Korinta Caruurta marka la gaaro 2018;
- Iyo ugu danbayn in la xoojiyo dabagalka iyo Kor-joogtaynta tayada adeegyada Kala-Korinta Caruurta iyadoo loo marayo qaabka kaydinta xogta ee HMIS iyo Xogta Barnaamijka Sahanka Caafimaadka DHS;

## Horumarka Yoolalka Raaga (Sustainable Development Goals)

Hay'adda Qaramada-Midoobay ayaa waxay horay u dajisay Yoolalka Hormarka ee Milleniumka (MDGs) iyo Yoolalka Raaga ee Sustainable Development Goals (SDGs) iyadoo dhamaan Yoolalkaas ujeedooyinka laga leeyahay ay yihiin in ya yareeyo isku dheeli tirnaan la'aanta wadamada gudahooda iyo midda caalamka marka la gaaro sanadka 2030 ka. Ujeedada 3aad iyo Ujeedada 5aad ee Yoolalka Raaga waxay qeexayaan farsamooyinka tooska ah iyo kuwa dadban ee lagu gaari karo Kala-Korinta Caruurta. Ujeedada 3aad waxay si gaar ah ahmiyadda u saaraysaa in la hubiyo caafimaadka dadka iyadoo kor loo qaadayo bad-qabadka qofkasta da'da uu doono ha jiree. Yoolka 3aad qaar kamid ah waxay ay sii qeexayaan arimahan soo socda:

- 3.1—Marka la gaaro sanadka 2030 ka, in hoos loo dhigo heerka dhimashada hooyoda ee adduunka in ka yar 70 marka loo eego 100,000 ee hooyooyinka ilmaha nool dhalay.
- 3.7— Marka la gaaro sanadka 2030 ka, in la hubiyo helitaanka adeegyada Caafimaadka taranka oo ay ka mid tahay Kala-Korinta Caruurta, helitaanka macluumaadka la xiriira iyo wacyi-galinta. Sidoo kale in lagu dhafo caafimaadka taranka siyaasadaha iyo barnaamijyada qaran.

Yoolka 5aad ee Yoolasha Horumarka Raaga waxa uu xooga saarayaa isku dheeli tirnaanta dhamaan bulshada iyo in kor loo qaado awoodaha gabdhaha iyo dumarka. Yoolka 5aad qaybtiisa 5.6 waxay xooga saaraysaa in caalamka qofkasta uu helo xuquuqda uu uleeyahay Caafimaadka taranka iyadoo la raacayo habraacyada caalamiga ahee ee kasoo baxay Shirka loo yaqaan "International Conference on Population and Development ICPD" iyo habraacyada Heshiska

Beijing Platform for Action. Dhammaan shirarkaas waxaa xooga lagu saaray muhiimadda Kala-Korinta Caruurta iyo dhamaan adeegyada hoos yimaada iyadoo loo marayo farsamooyinka u qareemidda iyo dakhli u raadinta (Leidman et al., 2017).

## Xaaladda Dowladda Puntland ee Somalia ee Kala-Korinta Caruurta

### Guudmar

Dalka Somalia waxa uu kamid yahay meelaha aduunka ugu hooseeya ee tilmaamayaasha Caafimaadka taranka. Heerka Isticmaalka Ka-hortagga uurka waxa uu marayaa boqolkiiba 10% dumarka la qabo iyadoo boqolkiiba 1% oo kaliya dumarkaas isticmaalalka hababka casriga ah ee Kala-Korinta caruurta. Gabdhaha Da'doodu u dhaxayso 15-19 sano, waxaa isticmaala hababka casriga ee Kala-Korinta caruurta ka hor-tagga uurka boqolkiiba 11% oo kali ah marka loo bar-bar dhigo dumarka da'doodu tahay 40-44 sano jir oo iyagu boqolkiiba 2% kaliya ay ka isticmaalaan hababka casriga ah ee Kala-Korinta Caruurta.

Xogta Sahanka Caafimaadka ee Puntland iyo Guud ahaan Somalia waxay sheegaysaa (Directorate of National Statistics Federal Government of Somalia, 2020) in boqolkiiba 37% dumarka xaaska ah ee la qabo hadeer ay baahi u qabaan isticmaalka farsamooyinka Kala-Korinta caruurta. Xogta sahanka Caafimaadka ee dalka waxay kale oo intaas ay ku daraysaa in baahiyaha aan wali la daboolin ee Kala-Korinta Caruurta ay ku badan tahay boqolkiiba 37% meelaha baadiyaha ah marka loo fiiriyo bulshada ku nool magaalooyinka oo iyadu ah 36%.

Xogta sahminta Caafimaadka ee dalka waxaa kale ay soo saartay in dumarka waxbarashada heerka hoose kaga haray ama aan waxba barin ay baahida Kala-Korinta Caruurta ay aad ugu badantahay ayna gaarsiisan tahay boqolkiiba 37%. Xogta waxay sheegaysaa baahidaas inay kor usii kacday boqolkiiba 11% sanadka markuu ahaa 2006 dii (UNICEF Somalia, 2006).

Xogta sahanka caafimaadka dalka waxa kale ay soo saartay in helitaanka xirfadlayaasha caafimaadka ee u shaqeeya dumarka marka ay uurka leeyihiin ay aad u yartahay (30%), sidoo kale xogta sahanka caafimaadka waxaa kale ay soo saartay in uu aad u yaryahay adeegyada daryeelka asaasiga ah iyo daryeelka umulinta deg-degga ah (Basic comprehensive emergency and obstetric care). Xogta sahminta caafimaadka waxay kaloo sii ogaatay in heerka adeegga qallinka hooyada xilliga dhalmada uu yahay boqolkiiba 2% oo kali ah iyadoo heerka dhalmada hooyoyinka Soomaalida uu yahay 6 ilaa 7 caruur ah hooyo kasta ay dhasho.

Dhammaan xogtaas kor aan kusoo xusnay waxay na tusaysaa in khatarta u dhowaanshaha dhimashada hooyadda xilliga ay uurka leedahay ama ay dhalayso ay sii siyaadayso. Heerkaas o oo hadeer maraya in boqokiiba 692 hooyo ay u dhintaan xiliga dhalmada marka loo fiiriyo 100,000 oo hooyo xilliga dhalmada (Directorate of National Statistics Federal Government of Somalia, 2020).

Dowladda Puntland ee Soomaliya waxay dhibaatooyinkaas iyo xogtaas aan kor kusoo xusnay ay la wadaagtaa guud ahaan dalka Somalia. Puntland dhamaan caqabadaha dalka Soomaaliya ka jira way kala simantahay iyadoo wajahda markasta abaaro joogto ah, dhaqaale yari iyo dhibaatooyinka bay'ada la xiriira.

Hay'adda Save the Children International xafiiskeeda Somalia iyadoo taageero dhaqaale ka helaysa mashruuca FP2020 waxay ka taageertay Dowladda Puntand in la dhaqan galiyo siyaasad ku haboon helitaanka adeeg tayo leh oo ku saabsan Kala-Korinta Caruurta. Heerka Isticmaalka farsamooyinka ama hababka casriga ah ka hortagga uurka waxa uu marayaa boqolkiiba 14.2% marka la fiiriyo deegaanada Puntland, waxaana qiyaas ahaan la odorosay in dumarka gaaray da'da dhaqmaadka ee deegaanada Puntland ay yihiin 760,000. Waxaa la filayaa in in ka badan 107,920 dumar ah da'da dhaqmaadka jooga ay ka faaiidaysan doonaan siyaasaddan Qorshe howleedka Kala-Korinta Caruurta.

**Isticmaalka Habab-ka kala duwan ee Kala-Korinta Caruurta**

Si loo dhaqan galiyo mashaariicda Kala-Korinta Caruurta, waxaa muhiim ah marka hore in la ogaado heerka isticmaalka farsamooyinka lagu joojiyo Uurka. Xogta Sahminta Caafimaadka ee Dowladda Soomaliya ay soo saartay waxaa lagu ogaaday in farsamooyinka loo yaqaano naasnuujinta (LAM), Kaniiniyaasha, Irbadaha, nooca laysku beero (impant) iyo cinjirka galmada) ay yihiin hababka ay inta badan yaqaanaan bulshada Soomaaliyeed (Directorate of National Statistics Federal Government of Somalia, 2020). Xogta Sahminta Caafimaadka ee Soomaaliya waxaa kale ay sheegaysaa in boqolkiiba 63% dumarka Soomaaliyeed ee la qabo ama xaasas ka ah ay yaqaanaan ugu yaraan hal nooc oo uurka looga hortago. Xogta waxay kale oo sheegaysaa in Dumarka Soomaaliyeed ee horay guurka usoo maray ama hadeer la qabo ay aqoon u leeyihiin habab-ka casriga ah ee uurka looga hortago iyadoo boqolkiiba 17% kaliya dumarka horay guurka usoo maray iyo kuwa hadeer la qabo ay aqoon u leeyihiin hababkii hore ee hurka looga hortagi jiray oo aan casriga ahayn ay yaqaanaan. Xogta Sahanka waxaa kale ay sheegaysaa in dumar aad u kooban ay isticmaalaan hababka casriga ah ee uurka looga hortago.

Xogta waxay intaas kusii saraysaa in dumarka waxbarashada ka gaaray heer jaamacadeed ay intooda badan boqolkiiba 90% ay yaqaanaan hababka casriga ah ee uurka looga hortago.

**Baahiyaha aan la daboolin**

Baahiyaha aan la daboolin waxaa laga wadaa marka dumarka dhaqmaadka ah balse aan isticmaalin hababka uurka looga hortago islamarkaana aan rabin inay ilmo dhalaan ama xooga ay dib u dhigaan ilma dhalista (Sedgh et al., 2016).

Isticmaalka hababka Kala-Korinta Caruurta waxay kor u siyaaddaa sanaadkasta marka laga soo bilaabo 2015 kii. Xogta ka muuqata Sawirka (Sawirka 2) ee isticmaalka Kala-Korinta Caruurta ee laga soo aruuriyey Xarumaha Caafimaadka ee Puntland. Xogtaan waxay na tusaysaa in heerkii larabay aan wali lagaarin. Inkasta Dowladda Puntland ay samaysay hormaro la taaban karo in koor loo qaado Kala-Korinta caruurta iyo heerka dalbasho ee bulshado ay soo dalbanayso gaar ahaan Gobolka Kar-Kaar ee Puntland sida ku cad Sawirka 3aad.

***Sawirka 1. Isticmaalka Kala-Korinta Caruurta laga soo bilaabo Sanadkii 2015-2019***



**Sawirka 2 : Heerka Adeeg bixinta Barnaamijka Kala-Korinta Caruurta gobol-kasta ee Puntland**




## Arimaha ugu muhiimsan iyo Caqabadaha ka jira Kala-Korinta Caruurta

Caqabadaha ugu muhiimsan ee gaarista yoolka Kala-Korinta Caruurta ee Puntland.

## Abuurista Baahida Kala-Korinta Caruurta

Waxaa hubaal ah in barnaamijka Kala-Korinta Caruurta uu ubaahan yahay dhaqaale joogto ah. Sidaan horay ugusoo xusnay kor u qaadista Kala-Korinta Caruurta waxay hoos u dhigtaa ama yaraysaa in dumarka aysan qaadin uur marka aysan u baahnayn iyo sidoo kale in dumarka ay soo ridaan ilmo aysan u baahanayn inuu uurkooda ku samaysmo (Muhammad Farhan & Pervaiz, 2019). Dowladda Puntland ee Soomaaliya iyadoo kaashanaysa saaxiibada ka caawiya barnaamijyada Caafimaadka waxay xooga saartay inay daboosho baahiyaha Kala-Korinta Caruurta iyo in la gaarsiiyo adeegyadaas dhammaan bulshada u baahan inay helaan. Waxaa muhiim ah in helitaanka macluumaadka ama xogta ku saabsan Kala-Korinta Caruurta ay noqoto mid uu qofkasta oo muwaadin ah uu xaq u leeyahay iyadoo loo sii marsiinayo idaacadaha maxalliga ah, shirar la qabto ku saabsan arimahaas, tababaro iyo fariimo koob-kooban oo ay

soo gudbinayaan xirfadlayaasha caafimaadka. Inkasta oo dhamaan hababkaas kala duwan loo isticmaalay in lasoo gudbiyo macluumaadka Kala-Korinta Caruurta haddana wali waxaa hoos u dhac wayn uu ka jiraa helitaanka macluumaadka ku saabsan Kala-Korinta Caruurta. Xog uruurin laga sameeyey ayaa waxay muujinaysaa in isticmaalka Kala-Korinta Caruurta ay ku yartahay bulshada Soomaaliyeed xitaa kuwooda wadamada Yurub ku nool (Gele, Musse, & Qureshi, 2019).

Haddaba si loo siyaadiyo baahida loo qabo Kala-Korinta Caruurta, waxaa muhiim in la fahmo caqabadaha hortaagan iyo Fursadaha ka jira isticmaalka Kala-Korinta Caruurta. Waxaa la ogaaday in haddii tababaro gaar-gaar ah oo loo fidinayo xirfadlayaasha caafimaadka kuna saabsan hababka Kala-Korinta Caruurta ay muhiim u tahay kor u qaadista in dad badan ay soo dalbadaan adeegyada Kala-Korinta caruurta. Sidoo kael waxaa cilmi baaris lagu ogaaday in marka ragga iyo dumarka lamaanayaasha ah ay ka wada hadlaan muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta Caruurta ay kor u qaadayso baahida lamaanaayaasha u qabaan Kala-Korinta Caruurta (Gele et al., 2019).

## Helitaanka Adeegyada Kala-Korinta Caruurta

Isticmaalka iyo helitaanka adeegyada Kala-Korinta caruurta waxaa la isla ogolaaday inay muhiimtahay Siyaasadda guud ee caafimaadka qaranka Soomaaliya ee la dajiyey 2010-2015. Inkasta oo arintaan muhiimad gaar ah laga dhigay barnaamijka Kala-Korinta caruurta, hadana dumarka Soomaaliyeed boqolkiiba 90% ayaa wali dhala guryaha, ugu yaraan kala bar intaas kamid ah na waxaa ka umuliya umuliso dhaqameed. Taas waxay caqabad ku noqonasyaa in hooyooyin badan oo rabay inay isticmaalaan adeega Kala-Korinta caruurta (Federal Ministry of Health and Human Services, 2017).

Caqabadaha kale oo jira waxaa kamid ah in dumarka intooda badan aysan helin xirfadayaa ka dhalin kara wakhtiga foosha. Xarumaha bixiya adeega Kala-Korinta caruurta aad bay u kooban yihiin guud ahaan dalka maadaama aysan jirin xirfadlayaal ku tababaran hababka casriga ah ee Kala-Korinta caruurta.

Dhamaan caqabadahaas aan kor kusoo xusnay waxay dhamaan kor u qaadayaan baahida ay dad badan u qabaan Kala-Korinta caruurta, sidaas darteen ugu yaraan waa in bulshadu ay helaan macluumaad ku filan ay ku ogaan karaan adeegyada kala duwan ee lagu Kala-Koriyo caruurta.

Guud ahaan caqadaha ka jira bixinta adeega Kala Korinta caruurta waxaa ugu wayn helitaanka adeegga iyo bulshada qaar badan oo ka mid ah oo ka aamisan wax xun inay tahay sida ay sheegtay cilmi baaris la sameeyey (Kriel et al., 2019).

Guulaha la tilmaami karo ilaa hadeer laga gaaray Kala-Korinta caruurta waxaa kamid ah 10 xarumood ay taageerto hay'adda Save the Children ee Puntland. Xarumahaas dhamaantood waxaa loo tababaray xirfadlayaal awood uleh inay adeega Kala-Korinta caruurta ay bixiyaan sida ugu wanaagsan. Balse si loo daboolo baahiya wali dheeraadka ah, waxaa loo baahan yahay tababarro dheeraad ah oo loo fidinayo xirfadlayaasha kale ee aan wali fursadda u helin inaan helaan tababaradaas.

## Agab-yada loo isticmaalo Kala-Korinta Caruurta

Helitaanka Agabyada kala duwan ee muhiimka u ah adeegga Kala-Korinta caruurta waxay muhiim tahay bixinta adeeg dhamaystiran oo tayo leh. Caqabadaha ka yimaada helitaanka agabka loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta waxaa kamid ah, Kala go'id ku timaada agabka yaalay xarumaha caafimaadka. Sida caadada ah, hay'adda UNFPA ay ka taageerta Wasaaradda Caafimaadka Puntland inay hesho agabka loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta, kadib wasaaradda caafimaadka ayaa usii gudbisa xarumaha caafimaadka ee heer gobol iyo heer dagmo. Qaybta kaydka agabka caafimaadka ee wasaaradda caafimaadka ee Puntland ayaa waxay qaabilsantahay la socoshoda agabka yaalla, kuwa dhamaaday, kuwa wakhtigoodu dhacay. Xarun kasta waxay soo gudbisaa agabka markaas u yaalla iyo inta ay u baahan tahay bila soo socda.

## Maaliyadda

Inkasta ay dowladda Soomaaliya u qoondaysay adeegga caafimaadka boqolkiiba 15% heshiiskii lagu gaaray "Abuja", balse wali dhaqan galinta ballan-qaadkaas Dowladda Soomaaliya ma aysan gaarin (Nalwadda, Mirembe, Byamugisha, & Faxelid, 2010). Miisaaniyadda Dowladda Puntland iyo guud ahaan Dowladda Soomaaliya waxyar ayaa lagu bixiyaa caafimaadka. Taas waxaa usii dheer xirfadlayaasha caafimaadka ee deegaanka aad ayay u yaryihiin. In ku dhow boqolkiiba 50% bulshada Soomaaliyeed ayaa jeebkooda ka isticmaala kharashaadka caafimaadkooda. Bulshada guud ahaan ma haysato caymis caafimaad sidaas darteedna waxay ku khasban yihiin inay jeebkooda isticmaalaan.

Qaybaha bulshada aan dhaqaale ku filan haysan waxay inta badan soo daynsadaan kharashaadka kaga baxa adeega caafimaadka iyagoo kasoo amaahda saaxiibadood ama qaraabadood. Kaliya boqolkiiba 2% ayaa bulshada haysata adeega caymiska caafimaadka sida ay tilmaamayso Xogta Sahanka Caafimaadka ee dalka (Directorate of National Statistics Federal Government of Somalia, 2020).

Adeegga Caafimaadka ee dalka waxaa inta badan taageera hay'ado caalamiya, waxaana adag in la helo dhaqaale ku baxa Kala-Korinta caruurta Soomaaliyeed. Adeegga Kala-Korinta caruurta ee hadeer laga bixiyo xarumo caafimaad ee kooban waxaa taageero deeq bixiyaal iyadoo lasoo marsiiyo hay'ado caalamiya oo dalka ka shaqeeya.

**Caqabadaha hortaagan dhaqan-galinta barnaamijyada Kala-Korinta Caruurta:**

Howl-qabad yada la xiriira Kala-Korinta caruurta waxay inta badan la kulmaan caqabado badan. Shaxda soo socota waxay muujinaysaa caqabadaha kahor yimaada in la dhaqan galiyo adeegyada Kala-Korinta Caruurta. Shaxdaan waxaa lagu saleeyey shir ay iskugu yimaadeen hay'adaha ka shaqeeya caafimaadka Puntland sida wasaaradaha Caafimaadka, waxbarashada, arimaha diinta, iyo hay'adaha kala duwan ee UNICEF, UNFPA, TASS, SRC, WVI, SCI) Iyo kuwa kale oo badan.

Dhamaan kasoo qayb-galayaashii shirkaan looga doodayaycaqabaha ka jira Kala-Korinta caruurta waxay isla jeex jeexeen shaxdaan hoos kuxusan.

**Shaxda 1aad. Waxyaalaha ay Xoogan-yihiin, Ku-Liitaan, Fursadaha iyo Caqabadaha (SWOT) Analysis**

| Mowduuca | Ku Xooggan | Ku Liidatah | Fursadaha | Caqabadaha |
|---|---|---|---|---|
| **Maamulka iyo Hogaaminta** | 1. Siysaasad ahaan loogu soo jeedo<br>2. Jiritaanka Hay'ado Dowladeed,<br>3. Hogaaminta Wasaaradda Caafimaadka<br>4. Bay'o ka saacidaysa sida Xarumo Caafimaad<br>5. Siyaasado Mowducan la xirira oo diyaarsan | 1. Isku xirnaan la'aan ka jirta Wasaaradaha ay khusayso arimaha Kala-Korinta Caruurta<br>2. Siyaasadaha muhiimka u ah oo aan badnayn<br>3. Siyaasadaha jira oo aan cidna ku dhaqmin | 1. Amniga la isku halayn karo oo jira<br>2. Wada shaqayn buuxda ka dhaxaysa Bahwadaagta Caafimaadka | 1. Caqabado dhaqan iyo Bulsho<br>2. Inta badan Culumada iyo Dhaqanka oo kasoo horjeeda<br>3. Dano kale duwan oo iska hor imaanaya |
| **Waaxda Shaqaalaha** | 1. Agaasinka Shaqada iyo Shaqaalaha oo u howlan<br>2. Xirfadlayaal Caafimaad oo jooga<br>3. Macaahid iyo Jaamacado<br>4. Jiritaanka xarunta tababarada Wasaarada Caafimaadka | 1. Waxan jirin Xirfadlayaal tababaran<br>2. Raacitaanka Habraacyada oo liita<br>3. Shaqooyinka oo aan ukala qoondaysnayn Shaqaalaha xarumaha | 1. Xirfadlayaal caafimaad oo kaso qalin jabinaya jaamacadaha iyo macaahida<br>2. In la howl-galiyo dhakhaatirta fariisata xaruma gaarka loo leeyahay<br>3. Xirfadlayaal acafimaad oo gabdho u badano o ka shaqeeya xarumaha caafimaadka | 1. Xirfadlayaasha Caafimaadka oo qaar aysan ku qanacsanayn Kala-Korinta Caruurta<br>2. Xirfadlayaal shaqooyinka ka tagaya<br>3. Shaqaalaha oo aan dhiiri galin hasyan<br>4. Xirfadlayaasha oo qaarkood meelaha aan amniga ahayn tagi Karin. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Gudbina Adeegga Caafimaadka** | 1. Adeegyada Caafimaad oo la heli karo<br>2. Adeega Caafimaad oo bilaash ah<br>3. Helitaanka Shaqaale Caafimaad<br>4. Dhismaha Qaab-dhismeed nidaamka caafimaadka | 1. Wacyi galinta oo yar<br>2. Bahwadaagta Caafimaadka aan wada shaqayn<br>3. Dumarka oo fasaxa dhalmada aan helin<br>4. Sharciga oo adagtahay in la dhaqan galiyo<br>5. Kor-joogtaynta oo yar<br>6. Wada shaqaynta tacliinta sare iyo wasaarada oo hoosaysa | 1. Helitaanka adeega oo hoosaysa<br>2. Amniga oo yar<br>3. Xirfadlayaasha caafimadka oo kooban<br>4. Bulshada oo adeeg caafimaad aad ugu baahan<br>5. Helitaanka Marwo caafimaad ee xarumo caafimaadka asaasiga ah<br>6. Helitaanka xirfadlayaasha caafimaadka heerka HC iyo RHC<br>7. Helitaanka xarumo lagu tababaro xirfadlayaasha caafimaadka | 1. Caqabado dhaqan<br>2. Xirfadlayaasha caafimaadka aan ku qanacsanayn Kala-Korinta<br>3. Kala-Korinta aruurta oo siyaaba kala duwan laga aamisan yahay |
| **Maaraynta, iibinta Agabyada Caafimaadka** | 1. Availability of different methods<br>2. Trained staff<br>3. Availability of pharmacy | 1. Stock out of supply<br>2. Lack experts who can provide IUD<br>3. Lack of a referral system if complications are experienced | 1. Gaaritaanka<br>2. Amniga | 1. Helitaanka agabka Kala-Korinta Caruurta oo aad ukooban<br>2. Culumada iyo Dhaqanka aan ku qanacsanayn |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Nidaamka kaydinta xogta Caafimaadka** | 1. Xogta Kaydinta Caafimadka<br>2. Xogta ku kaydsan DHIS2 data system oo laga heli karo habeegyada FP ga<br>3. Xog kaydiyayasha gobolada oo shaqaynaya<br>4. Xog kaydiyayaasha degmooyinka oo shaqaynaya<br>5. Waraqaha xogta lagu kaydiyo oo diyaarsan<br>6. Kulamada wada shaqaynta oo joogto loo qabto | 1. Maalingalinta barnaamijka xog kaydiaha oo kooban<br>2. Xogta oo aan looga hadlin kulamada<br>3. Mashruuca Kala-Korinta caruurta oo aan laga dhaqan galin degmooyinka iyo gobolada Puntland oo dhan | 1. Jiritaanka heerarka kala duwan ee xarumaha caafimaadka<br>2. Shaqaale diyaarsan | 1. Sirta dadka isticmaalaya Kala-Korinta caruurta oo aan la xafidi karin<br>2. Sharciga ilaalinta xogta oo aan shaqayn |
| **Dhaqaalaha Caafimaadka** | 1. Wasaarada oo saaxibo fiican leh<br>2. Deeq bixiyaal diyaar u ah inay mal galiyaan barnaamijkaa Kala-Korinta Caruurta | 1. Dowladda oo aan wax dhaqaale ah ku bixin<br>2. Maal galin aan laga helin qurba joogta<br>3. Ku tiirsanaanta Deeq bixiyayaasha | 1. Adeegyada dowladda oo lagaheli karo degmoyinka iyo gobollada<br>2. Adeegyada Qurbajoogta oo la heli karo | 1. Dhaqaalaha u qareemidda oo aan la hayn<br>2. Guddiyo u diyaarsan oo aan jirin<br>3. Marka loo qareemayo oo aan lagu salayn xogta isticmaalka Kala-Korinta caruurta. |

# QAYBTA 3AAD: QIIMAYNTA KHARASHAADKA KALA-KORINTA CARUURTA

Wasaaradda Caafimaadka Puntland ee Soomaaliya waxay la tashiyo kala duwan la samaysay dhammaan bahwadaagta kala shaqeeya Caafimaadka gaar ahaan mashaariicda Kala-Korinta Caafimaadka (Liiska A ee dadkii kasoo qayb-galay dhamaystirka qorshahaan). Qorshaha maaraynta Kharashaadka Kala-Korinta Caruurta ee Puntland waxa uu ku salaysan yahay Ballan-qaadkii Dowladda Soomaaliya ay ku qaaday Shirkii London sanadkii 2012 kii iyo dib u eegistii xigtay ee ballanqaadkeedii 2017. Shirarkii isdaba jooga ahaa ee looga tashanayay Kala-Korinta caruurta waxaa la qorsheeeyey howl-qabadyo kala duwan iyo kharashaadkii howl-qabad kasta ku bixi lahaa. Haddaba Qorshe howleedkan waxa uu ka caawin doonaa wasaaradda Caafimaadka ee Puntland inay isla qiimeeyaan dhamaan bahwadaagteeda ka taageera caafimaadka heerka barnaamijka Kala-Korinta caruurta iyo horumaradii laga sameeyey ilaa inta laga gaarayo sanadka 2024.

Caqabadaha ka ka hor yimid dhamaystirka Qorshe-howleedkan waxaa ugu muhiimsanaa iyadoo lahayn tirakoob rasmi ah ee halbeeg-yada tirada gabdhaha aan wali la guursan iyo dumarka ku jira Da'da Dhaqmaadka ah. Helitaanka tirada rasmiga ah ee labadaas halbeeg.

## Mudnaanta Istiraajiyadeed

Qorshe howleedka maaraynta Kharashaadka Kala-Korinta Caruurta ee Puntland 2020-2024 waxaa lagu gaari doonaa iyadoo la fulinayo howl-qabad yadan hoos ku xusan. Dhamaan howl-qabad yadaan hoos ku xusan waxay la jaan qaadi doonaan sidii looga mira dhalin lahaa barnaamijka Kala-Korinta caruurta:

1. Kor-u-qaadista Kala-Korinta Caruurta
2. Helitaanka Adeega Kala-Korinta Caruurta
3. Helitaanka iyo Sugidda agabka Kala-Karinta Caruurta
4. Kor joogteeynta Kala-Korinta Caruurta
5. Dajinta Siyaasadaha Kala-Korinta Caruurta
6. Maamulka iyo Masuuliydaha Kala-Korinta Caruurta
7. Dhaqaalaha Kala-Korinta Caruurta

Haddaba dhamaan qodobada kor ku xusan waxaa loo doortay in lagu gaaro ka mira dhalinta barnaamijka Kala-Korinta Caruurta. Hadaba Dhamaan Istiraatiijooyinkan waxay naga saacidi doonaan sidii loo gaari lahaa dhamaystirka qorshe-howleedkan.

- **ISTIRAAJIYADDA 1AAD:** In kor loo qaado baahida dhamaan howl-qabadyada Kala-Korinta Caruurta iyadoo la hubinayo caafimaadka hooyada.
- **ISTIRAAJIYADDA 2AAD:** In la hormariyo barnaamijka xogta caafimaadka gaar ahaan xogta dabagalka Kala-Korinta Caruurta lagu korinayo.
- **ISTIRAAJIYADDA 3AAD:** In la hormariyo helitaanka iyo isticmaalka adeegyada Kala-Korinta Caruurta gaar ahaan meelaha ay adagtahay in la gaaro oo ay ku nool yihiin gabdhaha iyo dumarka jira da'da dhaqmaadka.
- **ISTIRAAJIYADDA 4AAD:** In la hagaajiyo Maamulka iyo Masuuliyadda heer gobol iyo heer qaran intaba.
- **ISTIRAAJIYADDA 5AAD:** In la helo dhaqaale joogto ah oo lagu maamulo Kala-Korinta caruurta.
- **ISTIRAAJIYADDA 6AAD:** In la helo Xog Cilmi baariseed oo lagu kalsoonaan karo si go'aan loogu qaato barnaamijka Kala-Korinta Caruurta.

**Sawirka 3. Kharashaadka Istiraatiijiyadaha Muhiimka ah.**



## Madax-Qaybeed yada Istiraatijiyadda Kala-Korinta Caruurta

Madax qaybeed-yada maaraynta kharashaadka ku baxaya Kala-Korinta Caruurta waxay ka kooban yihiin 14 Istiraataji si loo maamulo barnaamijka qorshe-howleedyada Kala-Korinta Caruurta ee Puntland.

### 1. Madax-qaybeedka 1aad: In la abuuro Baahida loo qabo Kala-Korinta Caruurta

Istiraatiijiyaddan waxay xooga saaraysaa in la howl-galiyo dumarka, dhalinyarada, hogaamiyayaasha bulshada, culumada iyo bulshada rayidka ah si guul looga gaaro Kala-Korinta Caruurta ee deegaanada Puntland. Dhammaan xubnahaas aan kor kusoo xusnay waxay iska kaashanayaan howl-galinta qorshe howleedkan iyagoo kuwada xiriiraya hababka kala duwan ee fariimaha la iskugu gudbiyo. Waxa la samayn doonaa istiraatiijiyad lagu hagayo qaabka bulshada dhaqamada aan fiicnayn ama xun looga baddalo (Behavior Change Communication Strategy). Shaqooyinka qaybtan hoos imaanaya waxaa kamid ah in tababar loo sameeyo Ragga laguna tababaro muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta Caruurta. Raggaas tababarka qaatay ayaa hadhow laga doonayaa inay u qareemaan tusaale fiicanna u noqdaan dhaqan galinta Kala-Korinta caruurta.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **DC1. In kor loo qaado baahida loo baahan yahay Kala-Korinta Caruurta iyadoo la howl-galinayo dumarka, dhalinyarada hogaamiyayaasha bulshada iyo culumada**

Si loo siyaadiyo baahida loo qabo dhaqan galinta adeega Kala-Korinta caruurta waxa muhiim ah in la dhaqan galiyo howl-qabadyo u wanaagsan dumarka, dhalinyarada bulshada qayaheeda kala duwan. Waxaa muhiim ah in la qabto shirar ay kasoo qayb galaan dhamaan xubnaha kala duwan ee bulshada si loo muujiyo muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta Caruurta. Xubnaha bulshada ugu fir-fircoon iyadoo la isticmaalayo ayaa waxa la samayn doonaa howl-qabadyo lagu muujinayo muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta Caruurta.

Howl-qabadyada kale ee muhiimka ah in la qabto waxaa kamid ah in la qabto maalin ragga kaligood la casumo si ay usoo bandhigaan muhiimadda ay leedahay barnaamijkaan.

Waxaa kale oo diyaarin doonaa manhaj gaar u ah qaabka tababarka ragga iyo siyaabaha kala duwan oo ay uga qayb qaadanayaan shaqooyinka lagu dhiiri galinayo habraacyada Kala-Korinta caruurta.

- **DC2. In Adeegyada Caafimaad ee Guur-guura lagu daro adeeg dheeraad ah oo kusaabsan Kala-Korinta Caruurta.**

Adeegyada Kala-Korinta caruurta waxaa lagu dhex dari doonaa adeegyada caafimaad ee guur-guura kuwaas inta badan laga fuliyo meelaha gaari-waaga ah. Adeegyadan waxaa kale oo loo isticmaali doonaa in wacyi galin ku saabsan muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta caruurta lagu soo bandhigo. Waxaa si taxane ah loo jeedin doonaa barnaamijyo gaar ah oo ka sheekaynaya muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta caruurta. Waxyaalaha khuraafaadka ah eel aga aamisan yahay Kala-Korinta caruurta ayaa waxaa loo soo bandhigi doonaa qaab ciyaar dhaqameed ah waaxaana muhiim ah in laga sheekeeyo helitaanka adeegyada Kala-Korinta caruurta.

- **DC3. In lasameeyo fariimo wacyi-galineed oo ku aadan xubnaha kala duwan ee bulshada.**

Fariimaha ugu muhiimsan ee ku saabsan Kala-Korinta caruurta ayaa la diyaarin doonaa. Waxaa fariimahan diyaarin doona qof fahansansan khibradna uleh diyaarinta fariimaha noocan oo kale ah. Waxaa fariimahan ku salaysnaan doonaan habraaca siyaasadda Communication Strategy taas oo la diyaarin doono. Waxaa qayb ka ahaan doona barnaamji Video ah oo dhalinyarta loogu tala galay in lagu wacyi galiyo loogana sheekaynayo Kala-Korinta caruurta.

**Sawirka 4. Kharashaadka Baahi-Abuurista**



## In la helo Adeegyada kala duwan ee Kala-Korinta Caruurta

Qorshe howleedka maaraynta kharashaadka mashaariicda Kala-Korinta Caruurta ee Puntland waxaa looga gogol leeyahay bixinta adeeg talo leh kaas oo bilaash ah oo dhammaan dumarka iyo dhalinyarada Soomaaliyeed ay ka heli karaan dhammaan degmooyinka iyo gobolada Puntland. Waxaa kale oo looga gogol leeyahay in la adkeeyo bixinta adeeg tayo leh iyo in la siyaadiyo tirade dadka isticmaalaya Kala-Korinta caruurta. La talinta dadka dalbnaya adeegyadan ayaa iyaduna aad muhiim ugu ah dhamaan bulshada doonaysa inay Kala-Koriyaan caruurtooda iyo sidoo kale inay helaan macluumaad ku saabsan hababka ama farsamooyinka kala duwan ee la isticmaali karo.

Iyadoo arintaas laga amba qaadayo qorshe howleedkan wuxu qeexayaa si loogaaro dhamaan ahdaaftaas in la diyaariyo tababaro ku saabsan sidii looga faaiidaysan lahaa Kala-Korinta caruurta iyadoo xooga la saarayo deegaanada aysan wali gaarin adeegyada caafimaadka, baadiyaha iyo xarumaha barakacayaasha.

Dhamaan qorshe-howleedyada ku xusan qorshahaan waxaa kale oo muhiim ah in looga faaiidaysto iyadoo la isticmaalayo adeega caafimaad ee guur-guura “Mobile clinics” taas oo saacidaysa fidinta adeegan iyo inuu gaaro deegaano aan horay loo gaarin.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **SDA I. Bixinta iyo helitaanka tababaro loo fidinayo adeeg bixiya-yaasha**

Tababarada la xiriira Kala-Korinta caruurta waxaa loogu talagalay in laga qabto dhamaan deegaanada Puntland gaar ahaan deegaanada aan wali laga qaban tababaro noocaan oo kale ah. Waxaa muhiim ah in marka 1aad la tababaro macalimiintii tababarka sii gudbin lahayd kadibna iyagu sii tababaraan adeeg bixiyayaasha Kala-Korinta Caruurta iyagoo ku tababarayo dhamaan noocyada kala duwan ee loo sameeyo Kala-Korinta Caruurta.

Tababarada macalimiinta waxaa xooga lagus aari doonaa qaababka iyo farsamooyinka kala duwan ee loo bixiyo wacyi galinta, la talinta iyo daryeelka qofkasta oo adeegan u baahan. Kooxaha caafimaadka ee kala duwan sida dhakhaatiirta, kal-kaaliyayaasha iyo umulisoosyinka ayaa ugu muhiimsan in loo tababaro qaabkii ay u bixin lahaayeen adeegyada kala duwan ee loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta.

- **SDA 2. Bixinta adeega Kala-Korinta caruurta iyadoo laga bixinayo dhamaan xarumaha Caafimaadka**

Tababarka Kal-kaaliya yaasha iyo Umulisooyinka waxay muhiim u tahay in la bixiyo adeega Kala-Korinta caruurta oo tayo leh gaar ahaan in hooyada macluumaad ku filan lasiiyo xiliyada hooyadu la talinta caafimaad u imaanayso xarumaha caafimaadka, marka ay hooyadu dhasho iyo marka ay tallaalka qaadanayso ama ciyaalka loo tallaalayo. Waxaa muhiim ah in bixinta adeega Kala-Korinta Caruurta lagu dhex daro bixinta adeegyada kale ee caafimaadka aan kor kusoo xusnay iyadoo la raacayo habraacyo u baahan la dajiyo. Habraaca isku xirka adeega Kala-Korinta caruurta iyo adeegyada kale ee caafimaadka marka la dajiyo waxaa la samayn doonaa tababaro la xiriira qaabka habraacyadaas la iskugu dhex darayo. Waxaa kale oo la dajin doonaa habraacyo muujinaya hababka loo bixinayo adeegga Kala-Korinta caruurtaa. Qorshe howleedkan waxa kale uu muujinayaa in la howl-galiyo adeegayaal ka masuul ah bixinta adeega Kala-Korinta caruurta.

- **SDA 3. In lagu tababaro adeeg bixiya-yaasha xarumaha gaarka loo leeyahay adeegga Kala-Korinta caruurta**

Waxaa muhiim ah in adeegga Kala-Korinta caruurta lagu tababaro xirfadlayaasha caafimaadka ee ka shaqeeya xarumaha gaarka loo leeyahay. Kahor inta aan lagu tababarin adeegyadan xirfadlayaasha ka howl gala xarumaha gaarka loo leeyahay waxa muhiim ah in mark hore lasameeyo qiimayn awoodda ay u uleeyihiin xarumaha gaarka loo leeyahay inay bixiyaan adeegga Kala-Korinta caruurta. Kadib waa in la dhisayo tayada xirfadlayaasha ka howl-gala xarumahan iyagu raba inay bixiyaan adeegyadan. Waxaa qorshaha yahay in la siiyo agabkii ay u baahnaayeen in adeeggan lagu bixiyo iyadoo marka hore ogolaanshaha laga helayo qofka adeegan soo dalbanayah.

**Sawirka 5. Kharashaadka Adeeg Bixinta**




**In la hubiyo Helitaanka, Sugidda Qalabka iyo Daawada**

Agab-yada loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta inta badan waxaa qaybisa wasaaradda Caafimaadka ee Puntland iyadoo taageero ka helaysa saaxiibada ka caawiya barnaamijkan. Waxaa jira caqabado badan oo soo wajaha xilliga qaybinta, tirinta iyo odoroska agabka loo baahan yahay. Caqabadahaas oo dhan waxaa lagu hagaajin karaa in la casriyeeyo adeegga lagu kaydiyo xogta agabka yaalla iyo isticmaalka. Hagaajinta xogta isticmaalka Kala-Korinta caruurta waxay muhiim u tahay in kor loo qaado bixinta adeeggan iyo shaqaalaha xarumaha tayadoona iyo xirfadooda kor loo qaado. Tallaabooyinka soo socda waxay muujinayaan qaababka looga howl-galiyo istiraatiijiyaddan.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **CS I. In la hubiyo nidaamka qaybinta agabka Kala-Korinta Caruurta**

Kor u qaadista aqoonta iyo xirfadda muhiimka u ah Kala-Korinta caruurta heer gobol iyo heer dagmo waxay muhiim tahay bixinta adeeg tayo leh. Qorshaha wuxuu sheegayaa in la tababaro xirfadlayaasha aqoontoodana kor loo qaado ku aaddan habka loo diiwaan galinayo xogta bixinta adeegga iyadoo la isticmaalayo habka casriga ah ee DHIS2. Waa in la tababaro hababka xogta loo soo gudbiyo loona soo dalbaado agabyada Kala-Korinta caruurta. Waa in laga hortago inay kala go'aan agabka Kala-Korinta caruurta. Wasaaradda Caafimaadka waxay soo saaraysaa xogta inta qof isticmaashay adeeggan taas oo ka saacidaysa in la ogaado tirada isticmaashay.

**CS 2: Howl-galinta nidaam isla xisaabtan oo lagu hagaajinayo adeega Kala-Korinta Caruurta.**

Howl-galinta nidaam isla xisaabstan oo ujeedkiisu yahay in kor loo qaado tayada adeegga Kala-Korinta Caruurta. Shaqaalaha wasaaradda Caafimaadka ee Gobol iyo heer dagmo waxay u baahan yihiin tababaro joogto ah oo lagu barayo sida ugu wanaagsan ee nidaam isla xisaabtan oo hufan loogu adeegi lahaa qofkasta oo adeeggan u baahan. Waxaa muhiim ah in la hagaajiyo hababka loo kaydiyo agabyada loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta iyadoo marka hore la bixinayo agabyada ugu horeeya ee kaydka ku jira kadibna loogu danbaysiinayo agabyada ugu danbeeyey ee la keenay xarumaha.

**Sawirka 6. Kharashaadka Agabka Kala-Korinta Caruurta**




**In la kor joogteeyo Barnaamijka Kala-Korinta Caruurta**

Koor-joogtaynta iyo is caawinta dhamaan qaybaha kala duwan ay khusayso qorshe-howleedka Kala-Korinta caruurta waxay muhiim u tahay bixinta adeeg hufan oo tayo leh. Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland ayaa hagaysa nidaamka adeeg bixintan iyadoo wada shaqayn kala yeelanaysa saaxibada kala shaqeeya adeeg bixinta Kala-Korinta caruurta. Haddaba tallaabooyinka soo socda waxay muujinayaan qaabka ugu haboon oo wada shaqayn fiicane ku imaan karto.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **MC I. Howl-galinta Nidaam ka kor u qaadista Shaqada**

Waxaa la samayn doonaa nidaam lagu qiimaynayo howl-galinta qorshayaasha Kala-Korinta caruurta iyadoo lagu ogaanayo caqabadaha ka jira howl-galinta nidaamka Kala-Korinta caruurta. Waxaa la dhaqan galinayaa nidaamka kor u qaadista shaqada iyadoo shaqaalaha iyo xarumaha adeeggan bixiya la qiimayn doono qaabka ay u bixiyaan adeegga iyo qaabka ay ula tacaamulaan qofkasta oo adeeggan soo doonanaya. Tababarka kor joogtaynta waxa la siin doonaa dhamaan xirfadlayaasha adeegan bixiya. Waxaa lagu tababari doonaa sidii ay u xarayn lahaayeen xogta adeeggan. Waxaa kale oo la hubin doona inay kusoo gudbiyaan xogtan wakhtiga loogu talagalay.

**MC 2: Kor u qaadista nidaamka wada shaqaynta ka dhaxeeya saaxiibada fuliya mashaariicda Kala-Korinta caruurta**

Wada shaqaynta dhamaan Hay'adaha kala duwan ee bixiya adeegga Kala-Korinta caruurta waxay muhiim u tahay sidii kor loogu qaadi lahaa lana joogtayn lahaa wada shaqayn hufan. Dhamaan hay'adaha ka shaqeeya Kala-Korinta caruurta waxa la farayaa inay soo gudbiyaan xogta iyagoo isticmaalaya nidaamka xog ururinta ee DHIS2. Waxaa muhiim ah in la qabto shir sanadeed lagu qiimaynayo howl-qabadyadii lasoo qabtay si loo xaliyo caqabaha ka jira bixinta adeeeggan.

Waxaa kale oo muhiim ah in shirarkan ay qayb ka noqdaan maamulayaasha xarumaha gaarka loo leeyahay iyagoo kasoo qayb galaya shirarka bahwadaagta Kala-Korinta caruurta.

**Sawirka 7. Kharashaadka Kor-Joogtaynta iyo Isuduwidda**



**In Siyaasadaha Muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta la sameeyo**

Siyaasadaha ilaa hadeeg dagsan ee wasaaradaha kala duwan ee Puntland laga hirgaliyey inta badan wax xiriir ah lama lahan siyaasadda Kala-Korinta caruurta. Si loo dar-dar galiyo nidaamka kor u qaadista Kala-Korinta caruurta waxa muhiim ah in siyaasadaha kala duwan ay so saaraan wasaaradaha bah-wadaagta la ah wasaaradda caafimaadka ee Puntland ay ku daraan muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta Caruurta.

Waxaa muhiim ah in marka hore la qiimeeyo dhamaan siyaasadaha laga anixiyey Puntland heerka ay ka turjumayaan baahiyaha Kala-Korinta caruurta kadibna marka xilliga dib u eegista lagu samaynayo.

Waxaa muhiim ah in loo qareemo barnaamijka Kala-Korinta caruurta si siyaasadaha muhiimka u ah loo dhaqan galiyo baahidana loo daboolo. Waxaa kale oo muhiim ah in siyaaddkasta ay u qareento helitaanka adeegga Kala-Korinta caruurta ee deegaanada ay daganyihiin Barakacayaashu.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **PA 1. Samaynta barnaamijyo loogu qareemayo Kala-Korinta Caruurta**

Waxaa la dajin doonaa samaynta Istiraatiijiyad loogu qareemayo Kala-Korinta caruurta. Waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa masuuliyadaha shaqo ee xirfadlayaasha caafimaadka sida dhakhaatiirta, umulisooyinka si looga faaiidaysto inay bixiyaan adeegga Kala-Korinta caruurta. Waxaa lagu tababari doonaa dhamaan xirfadlayaasha caafimaadka hababka iyo farsamooyinka kala duwan ee loo bixiyo adeegga Kala-Korinta caruurta. Waxaa kale oo la samayn doonaa fariimo loogu qareemayo in dhamaan saaxiibada wasaaradda caafimaadka ay u heelan yihiin bixinta adeeggan.

- **PA 2. Nidaamka Gunno siinta shaqaalaha aan rasmiga ahayn.**

Waxaa la dajin doonaa nidaam gunno lagu siiyo xirfadlayaasha caafimaadka aan joogtada ahayn kuwaas oo ku tababaran xirfadaha muhiimka u ah Kala-Korinta caruurta. Waxaa

xirfadlayaashaas lagu hagi doonaa habraacyo lagu sin doono gunnooyin ay ku shaqeeyaan xiliyada aan mushaharka loo hayn.

**Sawirka 8. Kharashaadka Siyaasadda iyo U Qareemidda**




**In Maamulka iyo Masuuliydaha Qorshahan la qeexo**

How-qabadyada la xiriira Kala-Korinta caruurta waxaa lagula socondoonaa habraacyo lagu hubinayo qaabka uga socdaan dhamaan gobolada iyo degmooyinka Puntland. Wasaaradda caafimaadka ee Puntland waxay qaban doontaa sanadkasta ilaa labo shir oo dib u eegis lagu samaynayo sida loo fuliyey adeegga Kala-Korinta caruurta. Sido kale waxa la samayn doonaa isla xisaabtan ku saabsan qaabka ay u fuliyeen hay'adaha kala duwan ee ka shaqeeya barnaamijkan. Waxaa qiimayn lagu samayn doonaa caqabadaha ka hor imaanaaya howl galinta qorshe howleedyada muhiimka u ah Kala-Korinta caruurta.

**Sawirka 9. Kharashaadka Mas'uuliyadda iyo Maamulka**




**In Dhaqaalihi ku bixi lahaa loo qoondeeyo.**

Dowladda Goboleedka Puntand ee Soomaaliya ilaa hadeer wax dhaqaale ah uma aysan qorshayn nidaamka Kala-Korinta Caruurta. Wasaaradda Caafimaadka Puntland waxay samayn doontaa u qareemid ay ku siyaadinayso dhaqaalaha loo baahan yahay in lagu fuliyo adeegyada Kala-Korinta caruurta. Waxay wasaaradda iyo wasaaradaha kale ee bah-wadaagta la ah sida wasaaradda Waxbarashada, wasaaradda arimaha qoyska ay fulin doonaan u qareemidda sidii dhaqaale loogu raadin lahaa iyagoo ka dalban doona baarlmaanka Puntland sidii ay dhaqaale ugu raadin lahaayeen. Waxaa tababar loo fidin doonaa xubnaha baarlamaanka iyagoo lagu tababari doono muhiimadda ay leedahay Kala-Korinta caruurta.

***Qorshe-Howleed yada kasii farcamaya Istiraatiijiyaddan:***

- **F I. U qareemidda sidii dhaqaale loogu heli lahaa barnaamijka Kala-Korinta**

Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland waxay u samayn doontaa u qareemid barnaamijka Kala-Korinta caruurta iyadoo ka gadi doonta barlamaanka Puntland inay taageeraan qorshe-howleed yada muhiimka u ah Kala-Korinta Caruurta. Wasaaradda Caafimaadka Puntland waaxay kale oo dhaqaale ka raadin doontaa dhamaan deeq bixiyayaasha caawiya barnaamijyada caafimaadka sidii dhaqaale ku filan loogu heli lahaa Kala-Korinta caruurta.

**Sawirka 10. Kharashaadka Maaliyadda**



# QAYBTA 4AAD: QIIMAYNTA

Maaraynta qorshe-howleedka kharashaadka Kala-Korinta caruurta waxaa hagaya howl-qabad yada ku jira siyaasaddan. Dhammaan qorshe-howleed yada halkan ku xusan waxay u baahan yihiin dhaqaale lagu dhaqan galiyo sidaas darteed qorshe-howleed kasta waxa uu u baahan yahay dhaqaale.

Tirada qorshe-howleedka iyo inta jeer ee la qabanayo qorshe-howleedkasta mudda u dhaxaysa 2020-2024 waxaa loo dajiyey kharashkii ku bixi lahaa.

Qaybahan soo socda ayaa soo koobaya kharashaadka ku baxaya qorshe-howleedkasta oo halkan ku xusan.

## Qiimaynta Qorshe Howleedka

Xogta qiimayaasha agabka Kala-Korinta caruurta waxaa laga soo kala aruuriyey meela kala duwan sida Wasaaradda Caafimaadka Puntland, Hay'adda UNFPA, Save the Children iyo hay'adaha kale ee ka shaqeeya mashaariicda Kala-Korinta caruurta.

Kadib kulan ay iskugu yimaadeen madaxda wasaaradda caafimaadka iyo xubnaha hay'adahaas kala duwan waxaa la isla qaatay qorshe-howleedyada kala duwan ee muhiimka u ah dhaqan galinta Kala-Korinta caruurta.

Dhammaan kharashaadka halkan ku xusan waa lacagta Dollar ka , qiimaynta kuma salaysna lacagta shilling ka Soomaaliga ah maadama sarifka lacagaha shillinka Somaliga uusan fadhin.

Jadwalka hoos ku xusan waxaa uu muujinayaa qiimayaasha agabka Kala-Korinta caruurta.

**Shaxda 2aad: Kharashaad-ka Agab-yada Kala-Korinta ee Sanadkasta.**

| Qaabka Kala-Korinta | Qiimaha | Heerka Wax-tarka Sanadkii | Kharashaadka Heerka Wax-tarka Sanadkii |
|---|---|---|---|
| **IUD** | **$ 0.30** | **0.22** | **$ 0.1** |
| **Agab-yada IUD-ga lo isticmaalo** | **$ 0.47** | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Maqaar-galaha** | **$ 8.90** | **3.3** | **$ 29.37** |
| **Agabyada Maqaar-galaha** | **$ 2** | | |
| **Kaniiniyada Kala-Korinta Caruurta** | **$ 0.21** | **20** | **$ 4.2** |
| **Kaniiniyada Progestogen ee afka laga cuno** | **$ 0.41** | **15** | **$ 6.15** |
| **Irbadaha** | **$ 1.15** | **4** | **$ 4.6** |

## Qiimaynta oo Kooban

Shaxda Qiimaynta qorshe-howleedka Kala-Korinta caruurta waxaa lagu saleeyey shax ay dajisay hay'adda FP2020. Farsamada loo maray dajinta kharashaadka waxaa laga cabir qaatay wadamada dariska ah. Haddaba kharashaadka waxaa loogu tala galay in lagu xisaabiyo kharashaadka guud eek u baxaya dhaqan galinta Kala-Korinta caruurta.

Kharash-ka guud ee ku baxaya Kala-Korinta caruurta ee Puntland sanadada 2020-2024 waa $ 4.5 million waxa uuna ku salaysan yahay siyaasadda guud ee 5 -ta sano ee Puntland.

Madax kharasheedka Baahi abuurka Kala-Korinta caruurta ayaa ugu badan isaga oo ka tujumata boqolkiiba 60% kharashaadka guud. Waxaa soo raacaya kharashka adeeg bixinta oo ah ka turjumaysa boqolkiiba 15.1%, waxa ku xiga kharashaadka Kor-joogtaynta oo ah (13.4%), kharashka Dhaqaale raadinta waa boqolkiiba (9%), kharash-ka u qareemidda waa boqolkiiba (3%), kharashka qaybinta agabka Kala-Korinta caruurta waa boqolkiiba (3%), Kharashka maamulka boqolkiba 1% ayuu kayahay kharashka guud.

**Sawirka 11. Kharashaadka Qorshe-Howleedyada**




**Shaxda 3aad. Kharashaadka marka loo fiiriyo Qorshe-howleedkasta, MilyanUS$***

| | 2020 | 2021 | 2022 | 2023 | 2024 | Total |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | USD | USD | USD | USD | USD | USD |
| Qaybaha Barnaamijyada | | | | | | |
| Kor-u-Qaadista Kala-Korinta Caruurta | 0.191 | 0.468 | 0.349 | 0.457 | 0.366 | **1.831** |
| Helitaanka Adeegga Kala-Korinta Caruurta | 0.150 | 0.087 | 0.136 | 0.140 | 0.085 | **0.597** |
| Helitaanka Agabka Kala-Korinta Caruurta | 0.186 | 0.066 | 0.046 | 0.047 | 0.060 | **0.404** |
| Kor-Joogtaynta Kala-Korinta Caruurta | 0.132 | 0.170 | 0.123 | 0.115 | 0.129 | **0.669** |
| Dajinta Siyaasadaha Kala-Korinta Caruurta | 0.551 | 0.288 | 0.256 | 0.020 | 0.021 | **1.137** |
| Maamulka iyo Maaraynta | 0.021 | 0.009 | 0.009 | 0.009 | 0.010 | **0.058** |
| Dhaqaalah Kala-Korinta Caruurta | 0.159 | 0.131 | 0.135 | 0.138 | 0.142 | **0.705** |
| Isku darka Kharashaadka | 1.390 | 1.220 | 1.054 | 0.926 | 0.812 | **5.401** |

* Kharashka Khaanad-kasta isma le-eka maadama xisaabta la isku-soo dhoweeyey.

**Sawirka 12. Kharashaadka Ballan-qaadyada Kala-Korinta Caruurta**



**Shaxda 4aad. Kharashaadka Ballan-qaadyada Kala-Korinta Caruurta, Sanadkasta, Milyan US$**

| Kharashaadka ballan-qaadkasta | | 2020 USD | 2021 USD | 2022 USD | 2023 USD | 2024 USD | TOTAL |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Ballan-qaadka 1aad** | In la hubiyo sharciyaynta, dhaqan-galinta iyo haykalka shaqo ee nidaamka Kala-Korinta Caruurta Puntland sanadka 2024. | 0.101 | 0.115 | 0.079 | 0.020 | 0.021 | **0.336** |
| **Ballan-qaadka 2aad** | Kor-u-Qaadista fahamka caqabadaha hortaagan helitaanka baahiyaha iyo isticmaalka adeegyada Kala-Korinta Caruurta sanadka 202024 | 0.191 | 0.468 | 0.349 | 0.457 | 0.366 | **1.831** |
| **Ballan-qaadka 3aad** | Hubinta tayada helitaalka adeegyo caafimaad oo tayo leh qaybna ay ka yihin Kala-Korinta caruurta iyadoo la gaarsiinayo boqolkiiba 80% sanadka 2024. | 0.150 | 0.087 | 0.136 | 0.140 | 0.085 | **0.597** |
| **Ballan-qaadka 4aad** | In hoos loo dhigto kala-go'a agabyada kaydka ee loo isticmaalo Kala-Korinta caruurta boqolkiiba 30% sanadka 2024. | 0.112 | 0.012 | 0.012 | 0.013 | 0.013 | **0.162** |
| **Ballan-qaadka 5aad** | In la xoojiyo nidaamka kor-joogtaynta Kala-korinta caruurta iyadoo la isticmaalayo nidaamka xog-kaydinta ee HMIS iyo (DHS). | 0.132 | 0.170 | 0.123 | 0.115 | 0.129 | **0.669** |
| **Ballan-qaadka 6aad** | In la raadiyo nidaamka wada sheeqaynayd oo xarumaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay uga qayb-qaataan sanadka 2024. | 0.159 | 0.131 | 0.135 | 0.138 | 0.142 | **0.705** |
| | | **0.845** | **0.984** | **0.834** | **0.882** | **0.756** | **4.301** |

**Sawirka 13. Kharashaadka Madax-yada ugu muhiimsan Istiraatiijiyadda.**



**Shaxda 5aad. Kharashaadka Madax-yada ugu muhiimsan Istiraatiijiyadda., Sanadkasta, Milyan US$**

| Costs by Strategic Priority | | 2020 USD | 2021 USD | 2022 USD | 2023 USD | 2024 USD | TOTAL |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Muhiimadda 1aad** | Kor-u-qaadista baahida Kala-Korinta Caruurta. | 0.191 | 0.468 | 0.349 | 0.457 | 0.366 | **1.831** |
| **Muhiimadda 2aad** | Tayaynta nidaamka xog la socoshada agabyada (LMIS) | 0.186 | 0.066 | 0.046 | 0.047 | 0.060 | **0.404** |
| **Muhiimadda 3aad** | Kor-u-qaadista helitaanka adeegga Kala-Korinta Caruurnta si loo gaaro dhamaan dumarka Puntland. | 0.108 | 0.044 | 0.092 | 0.095 | 0.047 | **0.387** |
| **Muhiimadda 4aad** | Helitaanka Nidaam maamul iyo maarayn heer gobol iyo heer deegaanba. | 0.471 | 0.182 | 0.186 | 0.009 | 0.010 | **0.858** |
| **Muhiimadda 5aad** | Helitaanka nidaam joogteeya dhaqaalaha adeeg-yada Kala-Korinta Caruurnta | 0.159 | 0.131 | 0.135 | 0.138 | 0.142 | **0.705** |
| **Muhiimadda 6aad** | Helitaanka xog cilmi-baariseed oo kor loogu qaadayo goáanada Kala-Korinta Caruurta. | 0.233 | 0.286 | 0.202 | 0.135 | 0.150 | **1.006** |
| | | **1.348** | **1.177** | **1.010** | **0.881** | **0.774** | **5.190** |

# QAYBTA 5AAD: U DIYAAR GAROW-GA HOWL-GALINTA

Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland waxay qaadanasyaa tallaabadda hogaamineed iyo masuuliyadeed ee lagu maamulayo Qorshe howleedka maaliyadeed ee Siyaasadda Kala-Korinta caruurta ee Puntland. Wasaaraddu iyada oo kaashanaysa hay'adaha bah-wadaagta la ah waxay hagaysaa siyaasadda maaraynta dhaqaale ee mashaariicda Kala-Korinta caruurta.

Wasaaraddu waxay qaban doonaa sanadkii kulama dhowr ah oo lagu dabagalayo shaqooyinka laga qabtay Kala-Korinta caruurta iyadoo isku bar bar dhigaysa shaqo kasta iyo heerkii laga rabay in laga qabtay. Wasaaraddu waxay ku qiimayn doontaa nidaamka loo yaqaano Tract20 Indicators

Xogta kasoo baxda kor-joogtaynta waxaa loo adeeg-san doonaa in la iskula xisaabtamo oo la qiimeeyo qorshe howleedyadii dagsanaa sidoo kale la daro baahiyaha iyo fursadaha markaas jira.

U qayb-sanayaasha barnaamijka Kala-Korinta caruurta ee heer dagmo iyo heer gobol waxay muhiim u tahay inay qayb ka ahaadaan isla xisaabtanka Kala-Korinta caruurta. Kulamadaas waxaa lagu qiimayn doonaa in la gaaray ujeedooyinkiisii iyo caqabada hor taagan in la gaaro ujeedooyinkaas. Waxaa muhiimadda la saari doonaa halbeeg-yadan soo socda:

- Halbeega 1a. Tirada dadka isticmaala hababka Kala-Korinta Caruurta, dhammaan dumarka isticmaalaha hababka casriga ah.
- Halbeega 1b. Tirada boqolkiiba inta isticmaasha hababka casriga ah ee Kala-Korinta caruurta
- Halbeega 2. Tirada dadka dheeraadka ah ee isticmaala Hababka casriga ah ee Kala-Korinta caruurta.
- Halbeega 3. Boqolkiiba inta dumar ah ee aan ku qanacsanayn isticmaalka habab-ka casriga ah ee Kala-Korinta Caruurta.
- Halbeega 4. Boqolkiiba inta dumar ah ee ku qanacsan isticmaalka habab-ka casriga ah ee Kala-Korinta Caruurta.
- Halbeega 5. Kharashaadka Kala-Korinta ee Dowladda ka yimaada.
- Halbeega 6. Sanadaha Kala-Korinta
- Halbeega 7: Tirada dumarka aan Uurka rabin

- Halbeega 8: Tirada Uurka aan la qorshaysan looga hortagay isticmaalka Hababka Casriga ah ee Kala-Korinta caruurta
- Halbeega 9: Tirada dhimashada hooyada uurka leh looga hortagay iyadoo la isticmaalayo hababka casriga ah ee Kala-Korinta Caruurta.
- Halbeega 10: Tirada ilmaha dhicisoobi rabay oo looga hortagay hababka Kala-Korinta caruurta.

Guddiga kor joogtaynta Kala-Korinta caruurta waxay kulmi doonaan si joogto ah si ay u qiimeeyaan in la gaaray Halbeeg-yadii la dagsaday. Dhamaan howl-qabadyada la isla ogolaaday waxaa lagu daba gali doonaa iyadoo la isticmaalayo barnaamijka Xog-Kaydinta ee lagula socdo heerka shaqo.

## LIFAAQA A. Hay'adihii kala duwanaa ee kasoo qayb-galay

| Tirada | Magac-yada dadkii kasoo qayb-galay | Hay'adda | Darajada |
|---|---|---|---|
| 1 | Dr. Jama Farah Hassan | MoH | Wasiirka Caafimaadka |
| 2 | Dr. Abdirizak Hersi Hassan | MoH | Agaasimaha Guud |
| 3 | Abdirizak Abshir Hersi | MoH | Agaasimaha C. |
| 4 | Su'di Hamid Isse | MoH | Agaasimaha C. taranka |
| 5 | Sundus Mohamud Abdalle | MoH | Sarkaalka Barnaamijka Kala-Korinta Caruurta |
| 6 | Ali Dirie | MoH | Agaasimaha C. Asaasiga |
| 7 | Abdiqani Hersi Shire | Save the Children | Agaasimaha C. taranka |
| 8 | Mohamed Hussein Kahow | Save the Children | Maamulaha Mashaariicda Caafimaadka |
| 9 | Jama Mohamed Da'ar | Save the Children | Maamulaha Mashaariicda Caafimaadka |
| 10 | Emily Monoghan | Save the Children | La taliyaha C. taranka |
| 11 | Sarah Ashraf | Save the Children | La taliyaha C. taranka |
| 12 | Ribka Amsalu | Save the Children | Lataliye Sare Mashaaricda Emergensiga |
| 13 | Mohamed Khalid Ali | Consultant | La taliye madax banaan |
| 14 | Abdisalam Bahwal | BCC/FP Analyst | Hay'adda UNFPA |
| 15 | Dr. Fatima Abdalla Nor | Bosaso University | Madaxa Umulisooyinka |
| 16 | Deka Muse Ahmed | MoH | La taliyaha C. taranka |
| 17 | Khadra Abdinasir Mohamed | MoH | Madaxa Xog uruurinta |
| 18 | Hibak Abdirizak Kulmie | MoH | Sarkaalka dabagalka |
| 19 | Firdowza Ahmed sugulle | MoH | Khabiir Umulisanimo |
| 20 | Sirad Adam | SRCS | Sarkaal Caafimaad |
| 21 | Ismail Haji Abdi | MOJRAR | Agaasime Guud |
| 22 | Mohamed Osman Moumin | ANPPCAN | Xiriiriye Mashruuc |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 23 | Hamdi Abdikani Shire | PSI | Xiriiriyaha Barnaamijyada Wacyi-galinta iyo badalidda caadooyinka. |
| 24 | Mohamed Abdinasir Sirad | TASS | Health and Nutrition Officer |
| 25 | Falastin Said Shire | PAM | Xoghayn |
| 26 | Yahya Mohamed Ali | ACF | Sarkaal Caafimaad |
| 27 | Mohamed Heegane | YPEER | Mamaule |
| 28 | Madeline Leslie | Save the Children | Xiririyaha Mashaariicda |
| 29 | Janet Meyers | Save the Children | La taliyaha C. taranka |
| 30 | Mohamed Abdi Arab | Save the Children | Xog Kaydiye |

## LIFAAQA B: SHAXDA HOWL-GALKA

| Kor-u-qaadista Kala-Korinta Caruurta | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Ballan-qaadyada** | **Mudnaanta Istiraatijiyadeed** | **Howl-qabad** | **Howl-qabad hoose** | **Agabka loo baahan-yahay** |
| **In la hubiyo sharciyaynta, dhaqan-galinta iyo haykalka shaqo ee nidaamka Kala-Korinta Caruurta Puntland sanadka 2024.** | Kor-u-qaadista baahida Kala-Korinta Caruurta. | In la garabsado Culumada, Hogaamiyayasha dhaqanka iyo masuuliyiinta ee hora yuga shaqaynaysay caafimaadka inay sidoo kale ka shaqeeyaan arimaha Kala-Korinta Caruurta. | In shirar lala qaato Hogaamiyayaasha iyo culumada | Agabyada Daabacaadda<br>Gunnada ka-qayb galyaasha-Gudaha<br>Gunnada ka-qayb galayaasha Gobolka<br>Gaadiid<br>–Qolka kulanka<br>Kharash Quraac ama Qado<br>Fududeeye<br>–Gunnada lataliyaha-Gudaha<br>–Gaadiid-bas |
| | | | In la wacyi galiyo lana-howlgaliyo xirfadlayaasha caafimaadka siida kuwooda dhadiga ah qaybna ay ka noqdaan barnaamijyada Kala-Korinta Caruurta. | Agabyada Daabacaadda<br>Allowance-Local Participant<br>Gunnada ka-qayb galyaasha-Gobollada<br>Transportation<br>Kirada Qolwaynaha<br>Quraac ama Qado<br>Macalin<br>Gaari bas ah |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |
| | | | | |

| Ballan-qaadyada | Mudnaanta Istiraatijiyadeed | Howl-qabad | Howl-qabad hoose | Agabka loo baahan-yahay |
|---|---|---|---|---|
| | | In la qabto shirar bulshada lala qaadanayo looga hadlayo Kala-Korinta caruurta. Shirarkaas oo gaar ahaan tababar la siinayo sidoo kale xooga la saarayo sidii Raggu kaalin wayn uga gaysanlahaayeen. | In la dajiyo niaam lagu xulayo dadka qaybta ka noqonanaya dajinta tababaradda la xiriira ka qayb-qaadashada Ragga ee arimaha Kala-Korinta caruurta. | Agabyada Daabacaadda |
| | | | | Kirada Qolwaynaha |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Gunnada La-taliyaha-Gudaha |
| | | | | Gaari bas ah |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | In la tababaro rag haldoor iyo hormuud u noqda arimaha Kala-Korinta caruurta. | Agabyada Daabacaadda |
| | | | | Qolwaynaha Shirarka |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Gunnada Wacyi-galiyayaasha |
| | | | | Gunnada ka-qayb galyaasha-Gobollada |
| | | | | Transport allowance - regional |
| | | | | Gunnada Wacyigaliyaha |
| | | | | |
| | | | | |

| Ballan-qaadyada | Mudnaanta Istiraatijiyadeed | Howl-qabad | Howl-qabad hoose | Agabka loo baahan-yahay |
|---|---|---|---|---|
| | | In dumarka laga qaybgaliyo kulamada ku saabsan arimaha Kala-Korinta caruurta. | In laga qayb-galiyo dumarka xirfadlayaasha caafimaadka culuumta ku saabsan sare u qaadida heerkooda u aqooneed. | Gunnada ka-qayb galyaasha-Gobollada |
| | | | | Agabyada Daabacaadda |
| | | | | Agabyada Daabacadda-Warqadaha waawayn |
| | | | | Allowance-Local Participant |
| | | | | Kiro gaari Landcruiser |
| | | | | |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |
| | | | | |

| Ballan-qaadyada | Mudnaanta Istiraatijiyadeed | Howl-qabad | Howl-qabad hoose | Agabka loo baahan-yahay |
|---|---|---|---|---|
| | | In la isticmaalo adeegyada guur-guura ee caafimadka, iyadoo lagu dhex darayo adeegyada Kala-Korinta caruurta si macluumaad faah-faahsan ay uga helaan. Sidoo kale in xarumaha caafimaadku ay noqdaan meelaha ugu muhiimsan ee warbixinada kala-korinta caruurta laga heli karo. | Iyadoo la isticmaalayo nidaamka Fariimaha Gaa-gaaban ee shirkadaha Telefonada in macluumaad la xiriira kala-korinta caruurta loo gudbiyo bulshada si khaladaadka ay ka fahansanyihin bulshada qaarkeed Meesha looga saaro. | SMS per message |
| | | | | Gunnada La-taliyaha-Gudaha |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | In dhammaan xarumaha caafimaad ay ku dhagsan yihiin warqado ku xardhan-yihiin macluumaadka Kala-Korinta Caruurta. | Daabacadda Kalar-wadata- 100 xabo |
| | | | | Hotel per diem/person regional |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | In la isticmaalo adeegyada caafimaad hadeer jira ee guur-guura | Gunnada Shaqaalaha Xarunta dhexe |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Meeting cost- National |

| Ballan-qaadyada | Mudnaanta Istiraatijiyadeed | Howl-qabad | Howl-qabad hoose | Agabka loo baahan-yahay |
|---|---|---|---|---|
| | | In la baadi-goobo cilmi-baarisyo lagu ogaanayo fariimaha ugu wanaagsan ee bulsahda lala wadaagi karo eek u saabsan Kala-Korinta caruurta. | Iyadoo lala tashanayo guddiga khuburada arimaha Kala-Korinta caruurta in la qeexo qaybaha kale ee bulsahda ee ay khusayso arimaah Kala-Korinta caruurta. | Agabyada Daabacaadda<br>Kirada Qolwaynaha<br>Quraac ama Qado<br>Gunnada Dadka safraya ee Gobollada<br>Gaari bas ah<br>Gunnada Wacyigaliyaha |
| | | | In Isuduwayaashasha caafimaadka ay qayb ka noqdaan isku dabaridka fariimaha Kala-Korinta caafimaadka ee deegaankooda khuseeya. | Allowance Vounteer<br>Kirada Qolwaynaha<br>Barnaamij Raadiyaha<br>Quraac ama Qado<br>Poster printing - 18" X 24" poster<br>Gaari bas ah<br>Gunnada Wacyi-galiyayaasha<br>Gunnada Dadka safraya ee Gobollada<br>Gunnada Wacyigaliyaha |
| | | | In dib-u eegis lagu sameeyo qoraallada kala duwan ee horay oo qoray kuna saabsanaa Kala-Korinta caruurta. | Agabyada Daabacaadda<br>Kirada Qolwaynaha<br>Quraac ama Qado<br>Gaari bas ah<br>Gunnada Wacyi-galiyayaasha<br>Gunnada Wacyigaliyaha |

| Ballan-qaadyada | Mudnaanta Istiraatijiyadeed | Howl-qabad | Howl-qabad hoose | Agabka loo baahan-yahay |
|---|---|---|---|---|
| | | In la diyaariyo fariimo saamayn leh oo aad looga fakaray. | In la diyaariyo fariimo saamayn leh oo aad looga fakaray. | Agabyada Daabacaadda |
| | | | | Hotel Per Diem - Capitol |
| | | | | Gunnada La-taliyaha-Gudaha |
| | | | | Gunnada Wacyi-galiyayaasha |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Transport - train |
| | | | | Gunnada Wacyigaliyaha |
| | | | | Kirada Qolwaynaha |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | In la dajiyo siyaasadda wacyi-galinta iyadoo loo fiirinayo qayb-kasta oo kamid ah bulshada. | Extra item |
| | | | | Poster printing - 18" X 24" poster |
| | | | | SMS per message |
| | | | | Website hosting page |
| | | | | Kirada Qolwaynaha |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Gunnada Wacyi-galiyayaasha |
| | | | | Gaari bas ah |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | In la daabaco siyaasadahaas loona qaybiyo bushada qaybaheeda kala duwan. | Agabyada Daabacaadda |
| | | | | Kirada Qolwaynaha |
| | | | | Quraac ama Qado |
| | | | | Gaari bas ah |
| | | | | Agabyada Daabacadda-Warqadaha waawayn |
| | | | | |

